# Carruurta qaarkood si halis ah ayay influensada ugu xannuunsadaan

## Dalka Norway carruur tiradooda gaarayso 80 000 ayaa halis ugu jiro in si darran ay influensada sannadlaha ugu xannuunsadaan.



Ilmaha qaba cudurrada iyo xaaladaha hoos ku xusan waxaa lagula talinayaa in ay influensada sannadlaha iska tallaalaan:

- cudurrada sambabaha ku dhaca (xitaa cudurka neefta)
- cudurrada wadnaha ku dhaca
- Cudur ama dhaawac neerfaha ah oo daba-dheeraada (tusaale ahaan cudurka qallalka iyo xaaladaha saamayn ku yeesha hab-shaqaynta sambabaha)
- Hoos u dhaca heerka hab-shaqaynta difaaca jirka taasoo u sabab ah jirro ama daryeelid (tusaale ahaan xubin ku-tallaalidda ama kansarka)
- Hawlgabka beerka ama kiliyaha
- Cudurka sonkoroowga
- Cayil aad u daran
- Xanuun kale oo halis ah ama daba-dheeraada kaasoo influensada dartiiisa si halis ah loogu xannuunsado, hab waafaqsan qiimayn gaarneedka qof dhakhtar ah (sida tusaale ilmaha oo leh cilladaha koromosoomka oona ku dhasha calaamadaha hidde-sideyaasha)
- Carruurta dhicisoobay. Halista waxay ugu badan tahay carruurta dhasha kahor 32 toddobaad ee uurka Tallaalka waxaa lagula taliyaa sannad kasta laga bilaabo da'da 6 bilood (da'da soo noqnoqota) ilaa 5 sano.

### Waa maxay influensada maxayna tahay sababta ay halis u noqoto?

Influensada da waa cudur faafa oo loo yaqaano influensada fayraska. Fayraska wuxuu sababa caabuqa sanka, cunaha, iyo sambabada. Influensada la mid ma ahan hargabka.

Calaamadaha Influensada badi ahaan si keddis ah ayay ku soo ifbaxaan, qandho heer kulul, muruq-xannuun, madax-xanniin iyo daal. Carruurta qaarkood way shubnaan.

Fayraska influensada wuxuu sannadka kasta dalka Norway sababaa cudurro faafa, xilliyada bisha oktoobar ilaa bisha maajo. Influensada caadiha waxay ku dhacdaa carruurta. Xilliga influensada waxaa la qaadsiiyaa ilmo tiradooda gaarayso boqolkiiba 20 ilaa 30 %.

### Qaar kalena si aad u darran

Sannad kasta carruur tiradooda gaarayso 500 ilmaha ayaa si halis ah influensada ugu xannuunsadaan taasoo sababayso in isbitaalka lagu daryeelo.

Badidooda sideeda kale way caafimaad qabaan, laakiin ilmaha cudur ama xaalad fudud ku sugan 4 jibaar ayay halis ugu jiraan in si darran influensada ugu xannuunsadaan haddii la barbardhigo ilmaha fayoow.

Tirada ilmaha ee da`dooda u dhaxayso 0 ilaa 17 sano ee ku nool Dalka Norway waxay gaaraysaa 80.000, kuwaasoo halis dheeraad ugu jira in si halis ah ugu xannuunsadaan influensada. Kooxda ilmaha ee ugu wayn ee qaba cudurka neefta ama cudur kale oo sambabaha ku dhaca. Teeda kale, waxaa jiraan kumanyaal ilmo oo qaba cudurrda wadnaha ku dhaca, cudurka sonkoroowga iyo kuwa dareen-wadeyaasha sida cudurka qalalka. Haddii ilmahaas ay influensada ku dhacdo waxay kaloo dareemi karaan sii darsashada cudurka ay la dhibanayeen iyo in u ku dhaco cudurrada wehliyaan, sida tusaale caabuqa sambabaha.

Ilmaha caadi ahaan influensada darteed uma dhintaan, laakiin haddii ay dhacdana waxaa badi ahaan u sabab ah cudur kale ay qabeen ama xaalad kale oo kaalin dheeraad ka geysatay in u ku dhaco cudur halis ah.

Warbixin faahfaahsan ka akhriso https://www.fhi.no/va/barne-vaksinasjonsprogrammet/

FHI

## Tallaalka waxaa laga hela badbaado heer sare ah.

Tallaalka Influensada waa tallaabada ugu sahlan oona ugu fiican oo looga hortago influensada iyo waxyeladeeda halista ah. Sidaas darteed, ilmaha halista ugu jira in si darran ugu xannuunsadaan waa in influensada laga tallaalo xilliga dayr kasta. Tallaalka influensada wuxuu sidoo kale hoos u dhiga calaamadaha influensada ee u qofka ku dhacay inkastoo laga tallaalay.

## Tallaalada influensada ee dalka Norway ee ilmaha ka ansaxsan

ee loogu talagalay waa laba nooc kala duwan: tallaal irbad ah (u ansaxsan dhammaan ilmaha da`dooda ka wayn 6 bilood) iyo kuwa sanka lagu buufiyo (u ansaxsan ilmaha da`dooda u dhaxayso 2 ilaa 17 sano).

Tallaalka buufinta sanka waa in aan loo isticmaalin carruurta qabta neefta daran, neefta oo ku qabata, difaaca jirka oo daciifa, ama sanka oo furan ama afka oo kala daata. Marna tallaal lama siin karo haddii cunugga u xasaasiyad u qabo maaddada tallaalka influensada.

Carruurta da'dooda u dhaxayso 6 bilood ilaa 9 sano, kuwaas oo aan la tallaalin ama hore loogu sheegay inay qabaan cudurka influensada, laba qiyaasood oo tallaalka hargabka ah ayaa lagu talinayaa kaddib markii ugu yaraan 4 toddobaad ay ka soo wareegato, iyadoo aan loo eegin nooca tallaalka.

## Daawada tallaalada maxay ka kooban tahay?

Daawada tallaalka laysku duro waxay ka kooban tahay qaybo ka mid ah fayraska influensada, biyo nadiif ah, milixyo kala duwan iyo walxo kale oo kaabayaal ah. Tallaalka buufinta sanka waxaa ku jira fayruusyada influensada oo aan noolayn, oo daciif ah oo wax laga beddelay si ay ugu noolaadaan muddo gaaban xuubka sanka oo aysan ugu noolaan karin inta kale ee jirka. Waxa kale oo ku jira biyo nadiif ah, milix, sonkor iyo jelatin.

## Sidee ayay tallaallada u shaqe-eyaan?

Waxtarka tallaalka waa hadba nooca fayraska ee sababay influensada, hargabka ee keena caabuqa, sida tallaalka ula mid yahay fayrasyada influensada ee xilligaas wareegaya, iyo nooca daawada tallaalka la isticmaalo. Teeda kale xaaladda caafimaadka ilmaha saameyn ayay waxtarka ku yeelataa.

Waxtarka tallaalka influensada wuu kala duwan yahay sannadba sannadka ka dambeeya, laakiin celcelis ahaan qiyaastii waa boqolkiiba 60. Sidaas darteed, dadka qaar ayaa qaadi kara hargabka xitaa haddii laga tallaalay, laakiin tallaalka wuxuu hoos u dhigi karaa heerka dareenka cudurka iyo khatarta cudurrada halista ah.

## Tallaalka influensada ma sugan yahay?

Daawo iyo tallaal kasta waxay sababaan waxyeello kala duwan, laakiin qof kasta waxyeellada lama kulmo. Waxyeellada tallaalka influ-ensada aad ayay yar yihiin. Tallaalada hargabku aad bay u yartahay inay keenaan waxyeelooyin halis ah.

Sannooyin badan ayaa la isticmaalayay, tan kale waxaa la isticmaalayay sannado badan, tobanaan sano ee la soo dhaafayna, qiyaastii 500 milyan oo qiyaasood ayaa la siin jiray sannadkii.

- Tallaalka la isku duro wuxuu sababi karaa danqasho, barar iyo soo guduudashada goobta la isku duro, halka tallaalka lagu buufiyo sanka uu sababi karo sanka oo xirma oo dareere ah.
- Labada tallaalba waxay sababi keeni karaan dareenka jirrada fudud, murqo-xanuun iyo qandho oo 1-2 maalmood ka dib tallaalka.
- Xasaasiyadda ama waxyeellooyinka kale ee daran waa dhif.
- Tallaallada ma sababaan cudurka influensada ee ilmaha ku dhaco.

## Halkee ayuu ubadkayga iska tallaali karaa?

Tallaalka waxaa caadi ahaan la helaa laga bilaabo biska oktoobar ilaa bisha diseembar. Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxaad warbixin ku saabsan tallaalka, ka heli kartaa barta internetka ee dowladda hoose ama dhakhtarka qoyska. Carruurta ku jira isbitaalka ama l dhakhtar takhasus xaaladooda la socdo isla goobtaas ayaa laga tallaali karaa.

## Qiimaha tallaalka waa intee?

Qiimaha tallaalka way kala duwan yihiin. Ku saabsan qiimaha ka akhriso barta internetka ee dowladda hoose ama dhakhtarka qoyska.

Warbixin faahfaahsan ka akhriso https://www.fhi.no/va/barne-vaksinasjonsprogrammet/

FHI